# Warmurtiyeedka Kulankii 8aad ee Guddiga Wadajirka ah ee Amniga (JSC)
# Entebbe, Uganda, 23 Juun 2011

1. Kulankii 8aad ee Guddiga Wadajirka ah ee Amniga ayaa la qabtay 23kii June 2011 waxaana lagu qabtay magaalada Entebbe ee Uganda. Waxaana kulanka wadashirguddoomiyay Ra'iisal Wasaare ku xigeenka ahna wasiirka gaashaandhiga Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka Soomaaliya, Md. Abdixakiim M. Xaji Fiqi, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Dr Augustine Mahiga, iyo Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiya Guddiga Midowga Afrika ahna madaxa AMISOM, Danjire Boubacar Diarra.

2. Kulanka waxaa ka soo qaybgalay wakiillo ka kala socda France, Italy, Japan, Sweden, Boqortooyada Ingiriiska, Maraykanka, Uganda, Soomaaliya, Midowga Afrika (AU), Midowga Yurub (EU), Ururgoboleedka IGAD iyo Qaramada Midoobay (UN).

3. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu dib-u-eegid ku sameeyay horumarkii laga gaaray hirgelinta go'aannadiisii ka soo baxay shirkii lagu qabtay Jabuuti 20kii Janaayo 2011. Kulanku wuxuu kaloo ka dooday talooyinkii ka soo baxay Warbixintii Hay'adaha Amniga Soomaaliya ee 2011, Warbixintii Qiimaynta Hay'adaha Aminga Soomaaliya ee 2010 iyo Warbixintii ka soo baxday siminaarka caalamiga ah ee lagu falanqeynayay arrimaha khuseeya dadka soo goostay (ka soo goostay kooxaha hubaysan). Siminaarkan waxaa la qabtay ka hor intuusan dhicin kulanka Guddiga Wadajirka ah ee Amniga.

4. Wadahadal ka dib, Guddiga Wadajirka ah ee Amnigu wuxuu garowsaday in xoogaa horumar ah laga gaaray amniga Soomaaliya. Guddigu wuxuu aqoonsaday in ciidamada Dowladda Federaal KMG Soomaaliya oo taageero ka haysta ciidamada AMISOM, waddamada deriska ah iyo saaxiibada bulshada caalamka ay qabsadeen dhul ballaaran. Dowladd Federaalka KMG waxay si gaar ah ugu mahadcelisay saaxiibadaas (Maraykanka, Uganda, AMISOM iyo Midowga Yurub), kuwaaso bixiyay barnaamijka tababarka Midowga Yurub. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu kaloo ammaan u soo jeediyay taageerada bulshada caalamka ee sida muuqata ugu jiheysan horumarinta hay'adaha amniga Soomaaliya. Guddigu wuxuu kaloo ku dhiirigeliyay qaybaha kale ee bulshada caalamka inay gacan ka geystaan dadaalkan socda.

5. Si loo adkeeyo horumarka ilaa iyo hadda la gaaray, Guddigu:

- Wuxuu mar labaad si adag ugu baaqay Dowladda Federaalka KMG inay si degdeg ah dibueegid ugu sameyso qayboqoraalka qorshaha xasillinta amniga Soomaaliya ee 2009, si loo fududeeyo dhakhsi u hirgelinta siyaasadaha dowladda iyo hay'adaheeda, kuwaasoo taageero ka haysta Guddiga Wadajirka ah ee Amniga iyo guddihooseedadiisa shaqo – iyadoo la eegayo xaaladda amniga ee hadda dalka ka jirta iyo talooyinka ku tilmaaman warbixinta kor ku xusan.

- Wuxuu hoosta ka xarriiqay baahida Dowladda Federaalka KGM Soomaaliyeed ay u qabto inay hormariso xiriirka hay'adaheeda amniga ay la leeyihiin maamullada ka jira gobollada iyo ciidamada ay saaxiibada yihiin. Wuxuuna saaxiibada dhammaantooda ugu baaqay inay bixiyaan wixii kaalmo ah ee loo baahanyahay in lagu bixiyo dadaalka ku aaddan horumarinta hay'adaha amniga Soomaaliya. Waxaana ka mid ah kaalmada saadka, farsamada iyo maaliyadda.

- Wuxuu garowsaday talo soo jeedintii ka soo baxday "*Warbixintii Hay'adaha Amniga Soomaaliya ee 2011"*, "*Warbixintii Qiimaynta Tababarka ee 2011*", *Warbixinta Qiimeynta Hay'adaha Aminga Soomaaliya ee* 2010 iyo Warbixintii ka soo baxday *siminaarka caalamiga ah ee lagu falanqeynayay arrimaha khuseeya dadka soo goostay* (ka soo goostay kooxaha hubaysan). Wuxuuna ku baaqay in la dejiyo baraamijyo wax qabad ku wajahan oo dhaqaale loo ururin doono.

- Wuxuu garowsaday talooyinkii ka soo baxay siminaarka caalamiga ah ee lagu falanqeynayay arrimaha khuseeya dadka soo goostay (ka soo goostay kooxaha hubaysan). Wuxuuna saaxiibada bulshada caalamka ku guubaabiyay inay taageero ka geystaan maamulka tirada dadka soo goostay ee hadda la hayo isla markaasna fududeysa tallaabooyinka dhaqaale joogta ah loogu heli lahaa dadka soo goosta.

- Wuxuu garowsaday inay jiraan hawlo weli taagan oo u baahan in taageero laga geysto sida hawlgelinta wasaaradaha Gaashaandhiga, Arrimaha Gudaha iyo Amniga, Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, Guddiga Baarlamaanka u qaabilsan arrimaha kormeerka, ururrada rayidka ee amniga. Sidaa darteed, guddigu wuxuu dhinacyada ay khusayso ugu baaqayso inay taageerada sida ugu dhakhsi badan u bixiyaan.

- Wuxuu Dowladda Federaalka KMG ugu baaqay inay qaaddo tallaabooyin wax looga qabto carruurta ku jirta ciidanka.

- Wuxuu ku soo celiyay sida ay uga go'antahay inuu shiro labadii biloodba hal mar. sidaa darteed, shirka soo socda ee guddiga waxaa lagu qaban doonaa magalaada Muqdisho. Markaa ka dib, guddigu wuxuu ka baarandegi doonaa inay dhici karto inuu kulmo labadii biloodba hal mar, kulankaasoo ka dhici doona magaaalada Muqdisho ama meel kale. Guddi-hooseedyada shaqo ee farsamada waxay kulmi doonaan labadii toddobaadba mar si ay u hormariyaan arrimaha amniga.

6. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu ammaan ballaaran u soo jeediyay dadaalka uu bixiyay taliyaha ciidamada AMISOM, Jeneraal Nathan Mugisha, kaasoo 70% ee magaalada Muqdisho gacanta u soo geliya Dowladda Federaalka KMG, isagoo aad uga taxadiraya inaan waxyeello loo geysan dadka rayidka ah. Isla markaasna horumarinaya hawlgalka, waxqabadka, taliska iyo joogteynta hawlgalka ciidamada Dowladda Federaalka KMG. Guddigu wuxuu Jeneraal Mugisha dadaalka muuqda ee uu qabtay iyo kaalinta uu ka cayaaray xasillooni ku soo celinta Soomaaliya.

7. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu garowsaday waxqabadka iyo hoggaanka suuban ee wasiirkii hore ee arrimaha gudaha iyo amniga Soomaaliya, marxuumkii Abdishakuur Sheekh Xasan, ee uu ku hormarinayay arrimaha amniga Soomaalia. Guddigu wuxuu aad uga xumaaday, cambaareeyayna dilkii wasiirka. Wuxuuna tacsi u diray Dowladda Federaalka KMG iyo qoyskiisa.

8. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu u mahadceliyay dowladaha Burundi iyo Uganda, kuwaasoo si joogta ah taageera uga geysta nabad iyo xasillooni ku soo celinta Soomaaliya. Sidoo kale guddigu wuxuu si gaar ah u ammaanay geesinimada iyo adkeysiga cidaamada labadan dal iyo qoysaka askarta naftooda ku waaxay hawlgalka hadda laga wado Soomaaliya.

9. Guddiga Wadajirka ah ee Amniga wuxuu u mahadceliyay Dowladda Uganda oo martigelisay shirkan.

***Entebbe, Uganda, 23 Juun 2011***